



Pearson

Waa maxay imtixaanka fahanka garaadka?

Sababtee ayaa loo fuliyaa imtixaanka fahanka garaadka oo sababtee ayaad u qaadanaysaa? Si aanu kaaga caawino in aad bilowdo, ta soo socotaa waxay sharaxaysaa waxa uu yahay imtixaanka fahanka garaadku, sida imtixaanka fahanka garaadku u shaqeeyo iyo sababta ay adiga muhiim kuugu tahay in aad ka qayb gasho.

Imtixaanka fahanka garaadku waxa uu go'aamiyaa sida ay u garaad fiican yihiin carruurta iyo kuraydu marka la barbar dhigo fiikooda. Inta badan waa in la ogaado ka uu yahay dugsiga adiga kugu habboon, ka uu yahay heerka kooraska luqaddaadu ka uu ka bilaabo iyo waxay tahay caawimada kale ee adiga aadka kuugu faa'iido badnaan lahayd. Waa fursad fiican in aad muujiso waxaad samayn karto.

Waxaa jiri kara dhinacyo badan oo fahanka garaadka ah. Labba tusaale waxaa ku jira sida degdege ah iyo sida wanaagsan ee aad u dhammaystiri karto hawlaha madaxaaga ku jira ama sida xusuustaadu u wanaagsantahay. Iyaddoo la isticmaalayo hawlaha badan, imtixaanku waxa uu go'aamiyaa waxa uu yahay heerka aad ka joogtaa dhinacyo badan oo wax fahanka garaadka ah. Caadi ahaan waxay u shaqaysaa sidan:

Hogaamiye imtixaanka ayaa kula fadhiisan doono miiska oo sharxi doona hawlaha kala duwan. Waxaad buuxinaysaa hawlaha oo waxaad sidoo kale isku daysaa intaad karto in aad bixiso jawaabaha saxda ah. Hogaamiyaha imtixaanku waxa uu qoraalo ka sameeyaa sida tan ay u socoto. Tusaalooyinka soo socda ee hawlaha imtixaanka: Isku hagaajinta hal xidhaalaha waxyaabaha la isku haagajiyo, dhammaystirka nooca, xusuusta waxyaabaha ama isku hagaajinta sheekada habka saxda ah, waa wax iska caadi ah in aad u baahan karto in aad si aad ah u fekerto oo aad ka fiirsato helitaanka jawaabaha.

Sidoo kale waa wax iska caadi aah in aad awood u yeelan kari waydo dhammaan hawlaha. Aad ayay u wanaagsantahay haddii aad ushaqayso si degen iyo hab ka fiirsasho ah.

Shayga muhiimka ah waa in aanad hadal muddada imtixaanka. Imtixaanka fahanka garaadka aad dhammaystiraysaa waxa uu si buuxda ugu shaqeeyaa hadal la'aanta. – tani waa isku mid dhaqanadoo dhan iyo luqaddaha. Dhammaan hawlaha waxaa lagu sharaxaa iyaddoo la isticmaalayo sawiro oo waxaad u isticmaashaa gacmahaaga jawaabahaaga. Markaas ha ka baqan in aad fahmi waydo luqadda imtixaanka.

Ka qayb galkaaga imtixaanka fahanka khasab maaha. Waa in aanad qaadan imtixaanka, haddii aanad doonayn. Laakiin imtixaankan fahanka garaadka waxa uu kaa caawiyaa adiga in aad hesho taageerada ugu fiican iyo caawimo. Sidaas awgeed, waxay la qiimatahay uwada shaqaynta si feejigan iyo samaynta ilaa karaankaaga.



Meer informatie over onze Wechsler Nonverbal Scale of Ability (WNV-NL) vindt u op www.pearsonclinical.nl/wnv